

Dowlad goboleed

Soomaaliya waxa ka dhacay dagaal sokeeye oo kharaar isla markaasna socday sanado badan walina socda oo aan wali dhammaan.

Biloowgii dagaalka soomaaliya waxa uu ku salaysnaa dagaal qabiili ah oo reer reer la isu dilay dad badanna ku dhinteen, hanti badanna lagu waayey iyo dhammaan hantidii sida guud loo lahaa ama hantidii dowladda soomaaliyeed sida: Warshado, qalab, gaadiin, beero iyo guryaba.

Waxaa hadana badalay dagaal diimeed ay dadku u kala bexeen firqooyin diini ah sida Al....., Al....., Al... iyo Al...yaalo cusub oo calamo kala duwan wata.

Waxaa la diriray dadka aaminsan in diinta iyo dowladda la kala saaro iyo bulshada caalamka oo wadajira, waxaa wasoo baxay hogaamiyeyaal dhexdhexaad ah oo ka yimid dhaqdhaqaaqyadii diiniga ahaa sida Sheekh Shariif Sheekh Axmed madaxweynihii hore ee dowladda ku meelgaarka ah ee soomaaliya.

Waxaa ayana feersocday waa dagaalada qabiilada oo ayana aan maalinna ka joogsan Soomaaliya ayada oo aan ahay sidii biloowgii sanadihii 90maadkii oo ahaa dalka oo dhan. Dagaalada qabiil ee dhacaya maalmahan waxa ka mid ah dagaalkii maalmihii dhawaa ka dhacay magaalada Baledweyne iyo kuwii kasii horeeyey ee bishaan horaanteedii ka dhacay magaalada gaalkacyo ee bartama Soomaaliya.

Dagaalka qabiilka waxaa ayana garab socday oo aan dhammaan dagaalka u dhexeeya kooxaha dhaqdhaqaaqyada diiniga ah sida:

Dagaal soo jireen ah waxa uu u dhexeeyaa dhaqdhaqaaqyada Suufiyadda oo ahaa kooxda dhaqan ahaan Soomaaliya u haysatay arimaha diinta miyi iyo magaalaba iyo qolyaha Salafiyiinta ah oo hadda ah xooga ugu weyn ee Soomaaliya. waxa kale oo dagaalku u dhexeeyaa kooxaha Salafiyiinta ah.

Ayada oo kala duwanaanshahaas badani jiro ayaa waxgaradka Soomaalida iyo beesha caalamkuba isku raaceen in lasameeyo dowlad gobaleedyo dhowr ah oo ay aasaas u yahay qabiil iyo qabyaalad.

Ma ka hirgali karaa Soomaaliya dowlad gobaleedi?

Maxaa laga faa'iidi karaa? khasarihiisu muxuu noqonkaraa?

Midnimada Soomaaliya side noqondoontaa hadii qaabkaan Federaliga ahi hirgalo.

Amaanku side noqonayaa?

Soomaaliya habka Federal ka ah ee ay qaadatay inuu hirgalo waa 50/50 maxaa yeelay waxa suurto galinkara waa ayada oo ay bulshadu u dareento inuu qabiilkooda guul u soo hoyn karo oo kali ah. Maxaa yeelay wali qofka soomaaliga ah uma diyaarsana inuu qiimeeyo maxaa faaiido shaqsi ah uGu jira ama deegaankiisu helayaa.

Faaiidada habkaan waa ayada oo shakiga dhinaca cid ama qabiil ayaa qabiil kale dhacaya ayaa meesha ka baxaysa oo qolo waliba waxa ay joogi doontaa deegaankooda kheyraadkana boqolkiiba intii lagu heshiiyo ayey dowladda dhexe siinayaan inta kalena waa ay maamulanayaan. waxa kale oo ay ka faaiidikaraan musuqmaasuqa ayaa yaraanaya

maadaama dadka iyo dhulkuba yaryahay oo sida Federalka xadida hantida dadweyanaha ay u sahlan tahay in loo xado uma sahlanaandoonto.

Khasaaraha uGu weyn waxa uu noqonayaa midnimada Soomaaliya oo dhunta markasta oo uu wakhtigu sii dheeraadaba. khasaaraha kale waxa uu noqonkaraa qaniinimada iyo hantida dalka oo aan dadka isku si u gaareyn maadaama dalku ku kala hodansan yahay kheyraadka dabiiciga ah.

Midda Amaanka wadanka amaankiisa qayb kasta ayada ayaa leh amaankeeda gudaha oo dhinaca waa fiicnaanayaa, laakiin waxa xumaanaya isku dhacooduna badanayaa waa dowladgoboleed kasta waxa ay col latahay dowladgoboleedka deriska la ah. waxa ay isku hayaan dhul iyo qabiil taas ayaana sabab u ah dagaalada dabada dheeraaday ee dalka Soomaaliya.

Waxa aan isku deyey inaan masawib weyn ka bixiyo colaadda Soomaaliya, fadlan iisoo dir wixii aad jawaab uga baahanatahay.

Abdinasir M. Halane